## WARBIXINTA

# BAARITAANKA CRANSTON

Warbixinta Baaritaanka Dadweynaha ee ku saabsan dhacdadii 23ka illaa 24ka Noofeembar 2021, markaas oo in ka badan 30 qof ku dhinteen iyagoo isku dayayay inay doon yar kaga soo gudbaan Kanaalka Ingiriiska (English Channel)

© Xuquuqda daabacaadda waxaa leh Crown 2026

Daabacaaddan waxa lagu shatiyeeyay shuruudaha Shatiga Dowladda ee Furan v3.0, marka laga reebo meelaha si kale loo caddeeyay mooyaane. Si aad u aragto shatigan, booqo **nationalarchives.gov.uk/doc/open-government-licence/version/3**.

Halka aan ku aqoonsannay wax macluumaad ah oo xuquuq daabacaad ay leeyihiin dhinacyo qollo saddexaad ah, waa inaad oggolaansho ka heshaa cidda leh xuquuqdaas.

Daabacaaddan waxa laga heli karaa **www.gov.uk/official-documents**.

Su'aal kasta oo ku saabsan daabacaaddan waa in nalagu soo diraa cinwaanka **info@cranston.independent-inquiry.uk**.

ISBN 978-1-5286-6169-0

E03525225 02/26

Warqadda lagu daabacay waxay 40% ka kooban tahay walxaha aasaasiga ah oo warqadda laga sameeyo oo dib loo warshadeeyay.

Waxaa lagu daabacay Boqortooyada Ingiriiska (UK), waxaana daabacay HH Associates Ltd iyagoo wakiil ka ah Xafiiska Daabacaadda Dowladda ee Boqortooyada Ingiriiska.

# Soo-koobidda qodobada guud

Warbixinta Baaritaanka Cranston waxay ka kooban tahay shan qaybood.

**Qaybta 1** waxay guudmar ka bixinaysaa nidaamka Baaritaanka loo maray. Waxay sidoo kale caddeynaysaa waajibaadka sharci ee Dawladda Ingiriiska ee dhanka raadinta iyo samatabixinta laga sameeyo badda.

**Qaybta 2** waxay sharraxaad ka bixinaysaa dhacdadii 23ka illaa 24ka Noofeembar 2021 markaas oo in ka badan 30 qof ku dhinteen iyagoo isku dayayay inay doon yar kaga soo gudbaya Kanaalka Ingiriiska (English Channel) kana yimi Faransiiska. Waxay sharraxaysaa hay'adaha iyo ururada ku lug leh ka falcelinta ku soo gudbitaanka doomaha yaryar. Waxa lagu xusay in dadka ka soo gudbaya doomaha yaryar kordheen muddadii waxyar ka horreysay 23 illaa 24 Noofeembar 2021 iyo tallaabooyinka la qaaday si ficiladaas wax looga qabto. Qaybta 2 waxa kaabaya Lifaaqa 3 oo faahfaahinaya kala horreynta taariikheed ee dhacdoyinkii dhacay 23kii illaa 24kii Noofeembar.

**Qaybta 3** waxay diiradda saaraysaa wixii dhacay 23kii illaa 24kii Noofeembar 2021 si loo fiiriyo goorta, goobta iyo nooca xaaladda dhalisay shilka keenay dhimashada dadkan. Si taas loo gaaro, sida ay waajibinayaan Shuruudaha Degsan, qaybtani waxay tixgelinaysaa baaritaanka ay horey u sameysay Laanta Baaritaanka Shilalka Badda (Marine Accident Investigation Branch, MAIB). Marka la soo koobo, waxa ku qoran warbixin qaab sheeko ah loo dhigay oo ka hadlaysa waxyaabihii dhacay ka dib markii doonta yari ka soo baxday xeebta Faransiiska fiidnimadii 23kii Noofeembar 2021. Waxa ku qoran sida doontu biyo uga soo buuxsantay iyo sidii doonta yari u qallibantay saacadihii hore ee 24kii Noofeembar 2021 iyo hawlihii raadinta iyo samatabixinta ee dhacay habeenkaas iyo maalintii xigtayba. Warbixinta hadalka waxa ku xiga falanqeyn lagu sameeyay wixii dhacay habeenkaas, iyadoo diiradda la saarayo xogta la heli karo, jawaabaha qolyaha raadinta iyo samatabixinta, iyo dhacdooyinka keenay go'aankii iyo garawshiyihii qaldanaa ee lagu go'aamiyay in doontii yarayd la badbaadiyay.

**Qaybta 4** waxa lagaga hadlayaa dadkii saarnaa doonta yar. Waxay sharraxaysaa sida Baaritaanku ku go'aamiyay aqoonsiyada dadka shilkaas ku dhintay. Intaas ka dib waxay kelmad siinaysaa dadkii doonta yar saarnaa, iyadoo sharraxaysa, markay suurtogal tahay noloshooda iyo xaaladaha ku kallifay inay u soo bareeraan khatarta ay kaga soo gudbayeen Kanaalka Ingiriiska (English Channel).

**Qaybta 5** waxay gunaanad ka soo saaraysaa cutubyada hore ee la soo dhaafay. Waxay si waafaqsan Shuruudaha Tixraaca ee Baaritaanka bixinaysaa soojeedino loogu talagalay in lagu yareeyo suurtogalnimada uu ku dhici karo shil sidan u khasaare badan mustaqbalka. Soojeedinaha waxa la isugu kooxeeyay aagagan soo socda.

1. Soojeedinaha u gaarka ah doomaha yaryar ee soo gudbaya.

2. Soojeedinaha la xiriira ka falcelinta shilalka khasaaraha badan ee badda ka dhaca, kuwaas oo aan ku koobnayn doomaha yaryar ee soo gudbaya.

3. Soojeedinaha la xiriira qaab-dhismeedka iyo awoodda hay'adaha ku lugta leh hawlaha raadinta iyo samatabixinta.

4. Daabicista tallaabooyinka dhaqangelinta ee jawaabcelinta u ah soojeedinaha MAIB ka dib marka baaritaan la sameeyo.

## Qaybta 1: Taariikhda iyo Sooyaalka Baaritaanka

**Cutubka 1** wuxu soo koobayaa aasaaska Baaritaanka iyo sida loo dejiyay Shuruudihiisa Tixraac. Wuxu sharraxayaa sida shaqada Baaritaanka loo qaabeeyay wuxuna sharraxayaa yoolasha uu hiigsanayo inuu horumar ka sameeyo, oo ay ku jiraan daabicista baratakooladiisa kala duwan iyo qabashada dhegaysiyadiisa.

**Cutubka 2** wuxu qeexayaa mabaadi'da sharci ee la xiriira waajibaadka Dowladda Ingiriiska ka saaran raadinta iyo samatabixinta doomaha yaryar. Wuxu diiradda saarayaaa waajibaadyada caalamiga ah ee raadinta iyo samatabixinta dhanka badda iyo waajibaadka ku xusan Qodobka 2aad ee Heshiiska Xuquuqda Aadamaha ee Yurub.

## Qaybta 2: Macluumaadka dhacdooyinka 23 illaa 24 Noofeembar 2021

**Cutubka 3** wuxu qiimeynayaa macluumaadka guud ee ku saabsan doomaha yaryar ee lagu soo gudbo iyo khataraha khaaska ah ee ay ku keenaan hawlaha raadinta iyo samatabixinta. Wuxu hogo-tusaaleynayaa korodhka aadka u sare ee ku yimi tirada dadka soo gudbaya, iyadoo ay waxyar oo kooban ahaayeen 2014-tii illaa korodhkii weynaa ee 2018 illaa tirada xad-dhaafka ah ee soo gudubtay 2021. Wuxu qiimeynayaa qodobada dadka ku kallifa inay galaan safarka sidaas u khatarta badan, iyo sida kooxo mukhallasiin dambiilayaal ahi gacan u geystaan soo gudbinta dadka.

Cutubku wuxu sii waadixinayaa qodobada sii kordhiya khataraha doomaha yaryar ee ka soo gudba Kanaalka Ingiriiska (English Channel). Khatarahaas waxa ka mid ah biyaha oo aad u qaboow, saxmadda gaadiidka badda ee maraya Marinka Dover (Dover Strait), dhismaha doomaha la buufiyo ee la isticmaalay oo liita, qalab badbaado oo habboon oo aan doomaha saarnayn, iyo dadka soo gudbaya oo inta badan dad nugul ah.

**Cutubka 4** wuxuu guudmar ka bixinayaa hay'adaha muhiimka ah ee ku lugta leh ka jawaabista dhibaatada doomaha yaryar ee ka jira Ingiriiska iyo Faransiiska labadaba. Wuxu sharraxayaa doorarka iyo qaabdhismeedyada (oo ay la socdaan jaantusyada qaabdhismeedka) ee waaxaha dowladda ee muhiimka ah iyo hay'adaha fulinta ee hawsha ku lugta leh. Waxay sidoo kale faahfaahin ka bixinaysaa doorarka ay ciyaaraan shaqsiyaadka hay'adahaas ka tirsani.

Cutubku wuxu sidoo kale qeexayaa doorarka ay leeyihiin hay'adaha aan dowliga ahayn, sida ciidamada booliska, adeeg bixiyayaasha gaadiidka cirka ee la soo kiraysto iyo hay'adaha tabaruca raadinta iyo samatabixinta, kuwaas midka ugu muhiimsan yahay Royal National Lifeboat Institution (RNLI). Marka laga hadlayo hay'adaha ka qaybgala

hawlaha raadinta iyo samatabixinta, cutubku wuxu guudmar ka bixiyaa nidaamyada iyo khayraadka u diyaarka ah.

**Cutubka 5** wuxu sahaminayaa horumarka iyo isbeddellada ku yimid jawaabcelinta dowladda ee la xiriirta doomaha yaryar. Wuxu soo koobayaa caqabadaha hawlgal ee la xiriira dhibaatada wuxuna hogo-tusaaleynayaa sida doorarka iyo masuuliyadaha hay'adaha isula beddeleen, sida soo saaridda siyaasado iyo hawlgallo muhiim ah sida sida Howlgalka DEVERAN, Howlgalka ALTAIR, iyo Howlgalka SOMMEN (badanaa loogu yeero siyaadda 'kala wareegga').

**Cutubka 6** wuxu diiradda saarayaa hawlgallada ka falcelinta doomaha yaryar ee soo gudbaya, khaasatan agabka iyo diraarsanaanta Ciidamada Ilaalada Xeebaha ee HM. Wuxu qiimeynayaa shaqaalaha ka shaqaynayay waaxaha muhiimka ah ee raadinta iyo samatabixinta sannadkii 2021, khkaasatan Xarunta Xiriirinta Samatabixinta Badda ee Dover (MRCC Dover). Wuxu sidoo kale qiimeynayaa agabka iyo hantida u diyaarka ahaa waqtigaas in loo adeegsado hawlaha raadinta iyo samatabixinta iyo in tababar ku filan la siiyay shaqaalaha Ilaalinta Xeebaha Ingiriiska (HM Coastguard's). Wuxu intaas ka dib qiimeynayaa nidaamyada hawlgal ee Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska, sida kuwa loo adeegsado duubista iyo wadaagista macluumaadka iyo kuwa lagula xiriiro doomaha yaryar.

Natiijooyinka muhiimka ah ee ka soo baxay cutubkan waxa ka mid ah, midka ugu muhiimsan oo ahaa in dhibaato shaqaale yari ka jirtay MRCC Dover, taas oo ka horraysay Noofeembar 2021. Dhibaatada dhanka shaqaalaha iyo khataraha ka dhalanaya marar badan ayaa laga soo sheegay Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ka hor Noofeembar 2021. Nidaamka Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ee wadaagista aagaga/shebekadaha muu ahayn xalka ku filan dhibaatadan shaqaale yarida ee ka jirtay MRCC Dover.

Marka laga hadlayo agabka raadinta iyo samatabixinta, Ciimadala Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waxay ku tiirsanaayeen Ciidamada Ilaalada Xuduudaha iyo RNLI si ay uga jawaabaan dhacdooyinka doomaha yaryar ee soo gudbaya. Ka hor Noofeembar 2021 waxa laga warqabay in doomaha Ciidamada Ilaalada Xuduudaha aanay si buuxda ugu habboonayn shaqada raadinta iyo samatabixinta. Markii la soo gaaray Sibteembar 2021, Ciidamada Ilaalada Xuduudaha waxay soo sheegeen in khayraadkoodu 'la dhimay'. Gaabiska iyo ku filnaansho la'aanta hantiyaha Ciidamada Ilaalada Xuduudaha ee ay ku daboolayaan baahida lama xallin ka hor 23ka Noofeembar 2021.

Korodhka ku yimi doomaha yaryar ee soo gudbaya, oo lagu ladhay caqabadaha u khaaska ah doomaha yaryar ee soo gudbaya (oo ay ka mid yihiin in doomuhu aanay ku habboonayn in lagu safro iyo tirada dadka doontii kastaba saaran oo aad u badan) iyo awoodda hantida Ciidamada Ilaalada Xuduudaha oo xaddidan, ayaa culays saartay agabka, shaqaalaha iyo tabarucayaasha RNLI. RNLI waxay qabteen shaqo ay ku ammaanan yihiin oo ay kor ugu qaadeen awoodooda agab iyo khayraad, hase ahaatee taas si buuxda culayska uma fududayn. Si kastaba ha haatee, agabka iyo tabarucayaasha RNLI way wadeen adeegyada ay siin jireen Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska oo way ka shaqeynayeen dhacdadii 23ka illaa 24ka Noofeembar 2021.

Hantiyaha iyo agabka dhanka hawada, illaa bishii Sibteembar 2021 waxa caddayd in korodhka doomaha yaryar ee soo gudbaya ay culays wayn saarayeen diyaaradaha aan helikabtarta ahayn ee ay haystaan Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska. In kastoo qorsheyaal lagu soo iibinayo agab dheeri ah uu socday ka hor Noofeembar 2021, haddana korodhkaas dhanka khayraadka lama gaarin illaa laga soo gaarayay bisha saddexaad ee 2022.

Macluumaadka khuseeya doomaha yaryar ee soo gudbaya si joogto ah looma gelin, ama lama gelin islamarka dhacdadu dhacaysay, nidaamka maaraynta xogta ee Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska sababtoo ah shaqaalaha Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ee ku sugnaa MRCC Dover waxa tan-dhaafiyay tirada shilalka iyo dhacdooyinka ay la kulmayeen, kuna khasbayay inay qabtaan shaqooyin kale sida ka jawaabista taleefanada. Intaas waxa dheer, in Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska qaybtooda badda iyo hawadu ay kala isticmaalayeen nidaamka maareynta xogta oo kala noocyo duwan ayaa xaddiday macluumaad wadaagista.

Bishii Oktoobar 2020, Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ee ku sugan MRCC Dover waxay soo kordhiyeen taleefan gacmeed ay dadka doomaha yaryar saarani Whatsapp ahaan uga soo wici karaan xarunta kuna sheegi karaan goobta ay ku sugan yihiin. Inkastoo sida muuqata taasi tahay tallaabo fiican, waxa jiray dhowr dhibaato oo caqabad ku noqday wax-ku-oolnimadeeda, sida in aanay jirin siyaasad iyo tababar ku aaddan la socoshada taleefanka iyo in lagu fashilmay in la duubo wicitaanada la helo.

Caqabado dhanka luuqadda ah ayaa sidoo kale adkeeyay la xiriirista dadka doomaha yaryar saaran. Illaa 2018kii, Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waxay lahaayeen ‘Khad Luuqadeed’ uu ku diyaar yahay adeeg turjumaan. Si kastaba ha ahaatee, dhibaatooyin dhanka dhaqangelinta ah dartood ayaa sababtay in Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska aanay adeega Turjumaadda Khadka u isticmaalin hawlaha raadinta iyo samatabixinta doomaha yaryar. Dhibaatooyin dhanka isgaarsiinta ah ayaa sidaas darteed soo jiray, wax nidaam isgaarsiineed oo beddel ahna lama meeldhigin ka hor Noofeembar 2021.

Shaqaalaha Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waxay badankoodu aaminsan yihiin in dadka ka soo waca doomaha yaryar ay inta badan buunbuuniyaan heerka khatareed ee ay ku sugan yihiin. Tani waxay abuurtay khatarta in dadka doomaha yaryar saaran ee khatarta dhabta ah ku jira ee xarunta soo waca aan la rumaysan. Xaaladahan oo kale markay ku jiraan, shaqaaluhu waxay u baahan yihiin tababar khaas ah oo ay ku garan karaan khatar buunbuuninta dadka doomaha yaryar saaran. Tababarka caadiga ah ee sheegaya in macluumaadka ay sheegaan dadka xarunta soo waca sidooda loo qaato kuma filnayn xaaladda.

Waxaa jirey dhibaatooyin khaas u ahaa doomaha iskudayaya inay soo gudbaan kuwaas oo kordhiyay khataraha la xiriira howlaha raadinta iyo samatabixinta. Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska way ka warqabeen, ama waa inay warqabaan, hase ahaatee tababar, siyaasado, iyo tilmaamo ku filan arrimahani ma jirin. Arrimahan waxaa ka mid ahaa la xiriiridda dadka doomaha yaryar saaran ee xarunta soo wacaya iyo helitaanka goobtooda, mudnaanta siinta dhacdooyinka kala duwan ee doonyaha yaryar, iyo isticmaalka baaqa Gargaarka Degdega ah (Mayday) inta lagu jiro dhacdo ama shil doon yar.

**Cutubka 7** wuxu sharraxayaa heerka wada-shaqayneed ee u dhexeeya dhinacyada kala duwan ee ku lugta leh ka falcelinta raadinta iyo samatabixinta doomaha yaryar ee soo gudbaya. Wuxu tixgelinaya isku-dubba ridka iyo wada-shaqaynta u dhexeysa waaxaha dowaladda Ingiriiska iyo hay'adaha, u dhexaysa hay'adaha dowladda iyo qandaraaslayaasha ganacsiyeed ama hay'adaha tabaruca ku shaqeeya, iyo sidoo kale u dhexaysa hay'adaha dowladda Faransiiska iyo kuwa Ingiriiska. Wuxu sidoo kale tixgelin siinayaa qorshaha kormeerista Hay'adda Ilaalada Xeebaha (MCA).

Waxyaabaha muhiimka ah ee cutubkan lagala soo dhex baxay waxa ka mid ah in dowladdu ugu horayn u aragto doomaha yaryar ee soo gudbaya arrin ku tacaluqda amniga xuduudaha waddanka. Sidaas darteed, Xafiiska Arrimaha Gudaha ayaa isagoo xog ka helaya, markii loo baahdona, xiriirin ka helayay Waaxda Gaadiidka (DfT) oo iyana maalgelisa hawlaha MCA iyo Ciidamada Ilaalada Xeebaha hogaaminayay siyaasadda ka falcelinta xaaladda

Inkastoo ay sameeyeen ku dhowaad 90% hawlaha badbaadinta doomaha yaryar, Ciidamada Xuduudaha waxa loo tixgeliyaa inay door 'kaalmo ah' u hayaan Ciidama Ilaalada Xeebaha. Inkastoo Ciidamada Xuduudaha iyo Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ay ka wada shaqeynayeen hawlaha doomaha yaryar illaa 2018, haddana ma jiro wax isafgrad qoran ah oo u dhexeeya labadooda kaas oo muujinaya sida wada shaqeyntu u dhacayso, haddii tusaale ahaan xaalad adagi timaado. RNLI iyada waxay Ciidama Ilaalada Xeebaha ugu jirtaa taageero 'Cayim ama Sugan'. Xiriirka ka dhexeynaya waxa lagu sharraxay heshiis dhexmaray labadooda sannadkii 2010, oo illaa 2020kii waxay ku wada jireen isafgrad qoran oo sharci ah. Inkastoo ay si dhow u wada shaqeynayeen, ma jiro wax tababar wada jir ah oo ay wadaqaateen Ciidamada Xuduudaha, Ciidamada Ilaalada Xeebaha, iyo RNLI.

Illaa waxyar ka hor 23kii Noofeembar 2021, raadraacaha (tracker) Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska (xaashi isbriidhshiit ah oo ay u adeegsadaan iskuduwista hawlaha samatabixinta iyo ka jawaabista dhacdooyinka doomaha yaryar) ayaa loo diri jiray Ciidamada Xuduudaha, intaas ka dib ayay Ciidamada Xuduuduhu iyana kaas u isticmaalin jireen cusbooneysiinta nidaamkooda raadraaca iyo la socoshada ee u gaarka ah. Sida guud, nidaamka la socoshada iyo raadraaca Ciidamada Xuduudaha waxa la gelinayay xog laga helay nidaamka la socoshada iyo raadraaca Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska. Waxay u muuqataa in xogta Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ay ka hayeen nidaamka raadraaca Ciidamada Xuduuduhu uu koobnaa. Illaa Noofeembar 2021, nidaamka la socoshada xogta ee Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waxay Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska iyo Ciidamada Xuduuduhuba ka helayeen onlaynka.

Dhinaca agabka hawada, dhammaadkii 2021 diyaaradaha qumaatiga u kaca ee raadinta iyo badbaadinta waxay Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska u xilsaarayeen hawlo 'kaabis iyo hubin ah' si la isu waafajiyo tirada doomaha yaryar ee lagasoo gudbiyo Kanaalka iyo tirada doomaha yaryar ee la helay lana soo badbaadiyay. Tani waxay keentay in waqtiga duulimaadka ee diyaaaradaha qumaatiga u kaca badankiisa lagu lumiyo hawshan hubinta ah taas oo xaddidaysa waqtiga duulimaad ee diyaarka u ah hawlaha raadinta iyo samatabixinta ee soo dhaca maalintii inteeda dambe.

Xarunta raadinta iyo samatabixinta ee Faransiiska ee ka hawlgasha Marinka Dover, the Centre Régional Opérationnel de Surveillance et Sauvetage (CROSS) Gris-Nez, ayaa sidoo kale xogta ay ku helaan hawlgalladooda raadinta iyo samatabixinta ee khuseeya doomaha yaryar ku diiwaaniyay dukumeenti lagula socdo xogta. Dukumeentiga la socoshada xogta ee Faransiiska waxa iimayl ahaan MRCC Dover ugu dira CROSS Gris-Nez. Sida joogtada ah, Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska dukumeentiga la socoshada xogta ee Faransiiska kumay heli hab waqtiyaysan, taas oo saameyn way ku yeelatay xaaladda ka warqab ee Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska. Dhibaatadan daahitaanku waxay dhacday habeenimadii 23-ka illaa 24ka Noofeembar.

DfT ayaa korjoogtaysa hawlaha MCA iyadoo u maraysa Golaha Maalgelinta MCA. Goluhu wuxu shirarkiisa dib u eegis ugu sameeyaa diiwaanka khataraha ee MCA iyo arrimaha kaleba. Qodobada ka soo baxay shirka golaha kuma wad qorna dhammaan wadahadaladii khataraha ku saabsanaa. Taas beddelkeeda, khataraha ugu waawayn waxa lagaga hadlay meel ka baxsan kulamadaas. Intaa waxaa dheer, ma jirto wax rikoodh ah oo muujinaya in kulanka Golaha Maalgelinta laga dooday in diiwaanka khataraha ee MCA lagu daro khatar sheegays in laga yaabo inay Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ka tan bataan xaddiga doomaha yaryar ee soo gudbaya, in kastoo dukumeenti tilmaamaya khatarta la diyaariyay.

Qaababka aan rasmiga ahayn ee DfT ku korjogtaysay MCA waxa ka mid ah 'isku imaatinada doomaha yaryar" ee u dhexeeya DfT iyo MCA oo dhacay bilowgii Luulyo 2021. Hase ahaatee, wax diiwaan wadahadal ah lama kaydin, taas oo keentay inay marar badan suurtogal noqon waydo in fikir sax ah laga helo inta jeer ee kulanadaasi dhaceen, ama fikir waadax ah laga helo waxa lagaga hadlay ama lagaga niqaashay. In kastoo oo ay jirtay qiimeyn dhanka koboca ah oo DfT ku sameysay MCA taas oo la soo sheegay Oktoobar 2021, waxay ahayd mid baaxad ahaan xaddidan oo aan qiimeyn wax ku oolnimada iyo hawlkarnimada hay'adda.

Baadhitaanka Hay'adda Caalimiga ah ee Badaha (IMO) ee III ayaa MCA lagu sameeyay Oktoobar 2021 laakiin kaas qudhiisu mid xaddidan buu ahaa. Ujeedadiisa waxa ka mid ahaa go'aaminta illaa heerka Dowladda Ingiriiskú u hogaansantay waaajibaadkeeda si waafaqsan shuruucda IMO. Suurtogal mayahayn in faallo laga dhiibto nidaamyada, u hogaansamida habraacyada iyo habdhaqanada ay dejisay DfT ama Dowladda Ingiriiska guud ahaan.

## Qaybta 3: Dhacdooyinkii dhacay 23 illaa 24 Noofeembar 2021

**Cutubka 8** wuxu faahfaahin qaab sheeko ah ka bixinayaa dhacdooyinkii dhacay 23 illaa 24 Noofeembar 2021. Wuxu hoga-tusaalaynayaa safaka doonta yar ee gashay shilka 'Charlie', taas oo bud dhig u ah Baaritaanka. Wuxu sharraxayaa diyaargarawgii maalmaha 23 illaa 24 Noofeembar 2021, iyo xaalada taagnay habeenkii. Khaasatan, wuxu faahfaahinayaa hawlihii raadinta iyo badbaadinta ee la sameeyay saacadihii hore 24kiiNoofeermbar 2021 iyo maalintaas qaybteeda dambe.

**Cutubka 9** wuxu qiimeynayaa khayraadka u diyaarka ahaa Ciidamada Ilaalada Xeebaha HM habeenimadii 23kii illaa 24kii Noofeembar 2021. Wuxu si buuxda uga warramayaa sida dhaqdhaqaaqyada doomaha soo gudbaya u badnaayeen intii lagu jiray 2021 iyo culayska taasi saartay agabka iyo khayraadka.

Natajiiyooyinka ka soo baxay cutubkan waxa ka mid ah, in kastoo tirada shaqaalaha Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ee waddanka oo dhan ka sarreysay intii la rabay, tirada shaqaale xilliyeedka laga rabay MRCC Dover joogaan, oo ahayd saddex hawlwadeenada raadinta iyo badbaadinta ah, lama buuxin habeenimada 23ka illaa 24ka Noofeembar. Shaqaalaha keli ah ee si buuxda ugu aqoonta lahaa hawsha loo xilsaaray ee habeenkaas ka shaqeynayay qaybta raadinta iyo badbaadinta ee MRCC Dover wuxu ahaa Isku-duwaha Raadinta iyo Samatabixinta (SMC). Labada qof ee kale ee kooxda SMC habeenkaas ka joogay waxay ahaayeen xubno tababar ku jira: mid qayb ahaan aqoonta iyo khibradda shaqada wuu lahaa waxana loo tixgeliyay hawl-wadeen, ka kale looma tixgelin hawlwadeenimo.

Culayska dhanka shaqaalaha ee jiray habeenka 23ka illaa 24ka Noofeembar ayaa cadaadis saaray SMC-ga joogay Dover, oo aan awoodin inay wax nasasho ah helaan shifti 12 saacadood ah. Sida lagu xusay caddaynta SMC-gu bixiyay, maadaama uu heli kari waayo fursado nasasho waxay tani ku keentay inuu daal iyo culays badan dareemo. Shaqaale yaridu waxay sidoo kale keentay in aan la kormeerin shaqaalaha tababarka ku jira ee markaas loo xilsaaray hawlaha shaqooyinka rasmiga ah ee waaxda.

Dhowr markhaati oo u marag furay Baaritaanka ayaa sheeegay inay wax iska caadiya ahayd sannadkii 2021 in shaqaalaha MRCC Dover ka tanaasulaan nasashooyinkooda. Tan waxa sii xoojinaysa caddaynta muujinaysa, in ugu yaraan illaa Agoosto 2021, laga warqabay in shaqaalaha Ciidamada Ilaalada Xeebaha HM ee Dover wajahayeen "daal daran oo qarka u saaran gataati-dhac" oo aanay helayn waqti nasasho oo ku filan.

Taageerada masaafo ee MRCC Dover habeenka 23 illaa 24 Noofeembar ka helayeen shabakadda qaran ee Ciidamada Ilaalada Xeebaha HM jawaab buuxda umay ahayn shaqaale yarida xarunta ka jirta marka laga fiiriyo gaabiskeeda ka warqabka xaaladda taagan iyo macluumaad wadaagista.

Shaqaalaha shaqada kaga jiray MRCC Dover habeenimadii 23 illaa 24 Noofeembar waxay Baaritaanka u sheegeen in aanay helin wax tababar ah oo si khaas ah loogu talagalay raadinta iyo badbaadinta doomaha yaryar, sida tababar la xiriira nidaamka cusub ee loo dejiyay habraacyada shaqo ee hawlahaas u gaarka ah. In kastoo maamulka sare MCA sheegeen in tababarkaas la qabtay Agoosto iyo Sibteembar 2021, uma muuqato in tababarkaas gaaray shaqaalaha inta badan ku lugta leh hawlaha raadinta iyo badbaadinta doomaha yaryar. Tani waxay keentay jawi habdhaqano shaqsiyeed oo hawlaha loo qabto ka sameysmaan MRCC Dover, kuwaas oo aan waafaqsanayn habraacyada shaqo ee dejisan.

Nidaamyada Ciidamada Ilaalada Xeebaha HM waxay waajibinayaan in go'aan qaadashada SMC-ga ku sugan Dover uu qiimeeyo xubin shaqaale oo ka darajo sarreeya, Taliyaha

Xeeladaha Badda (Maritime Tactical Commander). Si kastaba ha ahaatee, tani may dhicin habeenkaas shaqaale yari ka jirtay heerka Taliska Xeeladaha Ciidamada Badda (Maritime Tactical Commander) iyo macluumaad isla wadaaga oo guuldaraystay, taas oo qayb ahaan ka dhalatay xaaladda mashquulka tan dhaafka ah ee ka jirtay MRCC Dover.

Bishii Noofeembar 2021, Ciidamada Ilaalada Xuduudaha Badda agabkooda iyo awood ku filan may hayn RNLI-na awoodooda aya la tan dhaafiyay. Inkasta oo ay muuqaneysay in habeenkii 23 illaa 24 Noofeembar 2021 ay jireen agabyo badeed oo ku filan, haddana Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska iyo Ciidamada Xuduudaha waxay ka caga-jiideen inay diraan wax ka badan hal markab, maadaama taas ay sii yareyn lahayd helitaanka maalinta xigtay ee agabkaas oo markii horeba yaraa.

Sidoo kale culays baa saarnaa shirkadaha bixiyaha gaadiidka hawada ee ay soo kiraysteen Ciidamada Ilaalada Xeebaha HM maadaama korodh wayn ku yimi tirada doomaha yaryar ee soo gudbayay sannadka 2021. Tan laguma darin in duulimaadka kor joogtaynta ee qorsheysnaa habeenkaas fashilmay, sababo la xiriir xaaladda cimilada ee habeenkaas. Hase ahaatee, ma jirin qorshe xaalad degdeg ah oo horay loogu dejiyay haddii duulimaadka ilaalinta iyo kor-joogtaynta si kadis ah loo baajiyo. Tani waxay dhalisay xaalad keentay in waqtiga lagu lumiyo qorsheyn iyo in saacadihii duulimaadka diyaaradda qumaatiga u kacda ee raadinta iyo badbaadinta loo adeegsado ilaalaynta iyo korjoogtaynta, taas oo keentay in duulimaadkaas loo waayay raadinta iyo badbaadinta subaxnimadii 24ka Noofeembar 2021.

Guud ahaan, agabka iyo khayraadka u diyaarka ahaa Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska habeenimadii 23 illaa 24 Noofeembar 2021 kumay filnayn xaaladda jirtay taasina waxay saameysay ka jawaabistooda dhacdada ‘Charlie’.

**Cutubka 10** wuxu fiirinayaa in jawaabta raadinta iyo badbaadinta ee laga bixiyay dhacdada ‘Charlie’ ay ahay mid ku filan marka loo eego xog uruurinta ay sameeyeen Ciidamada Ilaalada Xeebaha HM. Wuxu eegayaa ku filnaanshaha is-weydaarsiga macluumaadka ee u dhexeeyay Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska iyo hay’adaha kale ee kala hawlgala raadinta iyo samatabixinta, xiriirada lala sameeyay dadka doonta yar saarnaa, iyo habka loo maareeyay (ee loo uga jawaabay) gudbinta baaqa dalbashada Gargaarka Degdega ah (Mayday).

Natiijooyin muhiima oo dhowr ah ayaa ka soo baxay cutubkan. Maadaama aanu jirin duullimaad kormeer ah iyo sidoo kale macluumaad laga helay Ciidamada Ilaalada Xeebaha Faransiiska oo khuseeya xaaladda dhacdada ‘Charlie’, waxay taasi keentay in ka hor intaan la baahin baaqa Gurmadka Degdega ah (Mayday relay) ee aanay agabka gurmadku goobta iman, isha keliya macluumaad ee ay hayeen MRCC Dover waxay ahayd wicitaanada ka imanayay doonta yar.

Habeenimadii 23 illaa 24 Noofeembar 2021 dhibaatooyinka guud ee Ciidamada Ilaalada Xeebaha ka wajahayeen dhanka isgaarsiinta waxay ahaayeen kuwo si wayn u muuqda. Way adkayd in la maqlo wicitaanada wayna googo’ayeen. Adeegyada turjumaanka inta badan lama isticmaalin. Sidaas darteed, waxa jiray dhibaatooyinka dhanka isfahamka iyo ismaandhaaf badan oo ay keentay caqabadda dhanka luuqadda.

Ka dib markii wicitaanka koobaad lala yeeshay doonta yar ee dhacdada ‘Charlie’ khusayso, taas oo sababtay in MSC-ga joogay Dover ku dhalisay inuu aamino inay jirto khatar dhab ah iyo inuu baahiyo baaqa Dalbashada Gurmadka (Mayday relay), wicitaannadii xigay ee ka yimid doonta waxaa loo maareeyay si ka yara degdeg iyo muhiimad yar marka la barbar dhigo kii hore. Waxa lala lumiyay fursado lagu heli karayay macluumaadka cusub ee ku saabsan goobta ay ku sugan tahay. Gaabiskaas ka jiray maareynta wicitaanada waa in la fiiriyo iyadoo la tixgelinayo culayska saarnaa shaqaalaha joogay MRCC Dover. Illaa Nofeembar 2021, dhaqamada maaraynta wicitaanada ee aan badqabka lahayn waxay caado u noqotay ugu yaraan qaar ka mid ah goobtaas ka shaqeeya. MRCC Dover waxay ku shaqeynaysay taleefanka gacanta oo aan lagu xiriirin nidaamka dhexe ee isgaarsiinta. Ma jirin wax qiimeyn ah oo lagu sameeyay khatarta isticmaalkiisu oo ay qaadeen Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska. Illaa laga soo gaaray Noofeembar 2021, Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska may dejin nidaam lagu shaqeyn karo, kaas oo leh tilmaamo waadax ah, oo yareynaya khataraha hawlaha raadinta iyo badbaadinta.

Habeenkii 23ka iyo 24ka Noofeembar 2021, MRCC Dover markii hore way seegeen macluumaadka muhiimka ahaa ee ku saabsanaa goobta doontu ku sugnayd ee ay dadka saarnaa doonta yar ugu soo direen moobeelka gacanta. Wicitaanada ka imanayay doonta yar lagama jawaabin, sidaas darteed waxa lagu fashilmay in la helo macluumaadka cusub ee doonta ku saabsan. Mar keliya oo wicitaan laga jawaabay– taasoo u muuqatay in ay ka hor imanayso amar afka ah oo sheegayay inaan sidaas la sameyn – lama diiwaangelin, lamana garanayo waxa la isku yidhi.

SMC-ga joogay MRCC Dover wuxu go’aansaday inuu baahiyo baaqa dalbashada Gurmadka (Mayday relay) ee dhacdada ‘Charlie’ sababtoo ah horay ayuu qalbiga uga dareemay in xaalad degdeg ahi jirto sidoo kalena muu jirin duulimaad kormeer ah oo u sahli lahaa inuu fahmo dhibaatada ay doonta yari wajahaysay. Qorshaha SMC-gu wuxu ahaa in doonta Faransiiska ah, ee Flamant, maadaama ay ahayd doonta dowlad leedahay ee ugu dhaw dhacdada ‘Charlie’ ay gurmad iyo samatabixin ka dhex fidin doonto biyaha Ingiriiska. Hase ahaatee, ku guuldareysiga ay Flamant ku guuldareysatay ka jawaabista baaqa Gurmadka ayaa arrinta sii adkeeyay.

Maadaama aan wax xog ah laga helin baaritaanka dambiyeed ee Faransiisku weli wado, Baaritaanku wuu awoodi waayay inuu go’aamiyo sababta Flamanta uga jawaabi wayday baaqa Gurmad-dalbashada. Waa masuuliyadda maamulka Faransiiska inay tan go’aamiyaan. Si kastaba ha ahaatee, waxa fashilmay xiriirkii wadashaqeyneed ee u dhexeeyay Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska iyo Ciidamada Ilaalada Xeebaha Faransiiska ee dhanka ka jawaabista baaqa Dalbashada Gurmadka. SMC-ga joogay Dover muu ogayn markaas inuu Ciidamada Ilaalada Xeebaha Faransiiska ka codsado inay Flamant ku amraan ka jawaabista baaqa manuu sameyn codsigaas habeenkaas. Hase ahaatee, wicitaan talafoon oo kula hadlay Ciidamada Ilaalada Xeebaha Faransiiska wuxu ugu caddeeyay in baaq dalbasho Gurmad la helay iyo Flamant ay ahayd doonta ugu dhowayd.

Heerka jawaabta baaqa Gurmad dalbashada ee ka imanayay doomaha ganacsi ee gudbayay wuu hooseeyay, taas oo u muuqata inay liddi ku tahay waajibaadka uu saarayo Heshiiska Caalamiga ah ee Badqabka Nafaha ee Badda. Ugu dambeyntii, baaqii Gurmad dalbashadu muu noqon mid miro dhalay. MRCC Dover may helin macluumaad ku saabsan nooca khatarta ay wajahaysay doonta yari, manay helin wax bandhig caawimo ah oo wax ku ool ah. Sababaha keenay in aanu jawaab helin baaqa Gurmad dalbashadu badankiisu way ka baxsanayd awoodda iyo gacanta Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska. MRCC Dover may xakamayn karayn ficilada doomaha aagga marayay masuuliyadda kama dambeysta ah ee ku amri lahayd Flamant inay ka jawaabto baaqana waxa lahaa Ciidamada Ilaalada Xeebaha Faransiiska.

**Cutubka 11** wuxu qiimeynayaa ku filnaanshaha hawlaha raadinta ee dhacdada ‘Charlie’. Waxay qiimeynaysaa wax ku oolnimada laba unug ee loo xilsaaray hawsha raadinta, oo kala ahaa doonta Ciidama Ilaalada Xuduudaha, Valiant, iyo diyaarada helikabtarta ee qaybta raadinta iyo samatabixinta, R163.

Natiijooyin muhiima oo dhowr ah ayaa ka soo baxay cutubka. Natiijooyinkan waxa la gaaray iyadoo la tixgeliyay xaaladaha cimilo iyo jawi ee jiray habeenkaas, oo ta ugu muhiimsan ahayd masaafada waxa laga arki karayay oo hoosaysay. In kasta oo caddeyntu aanay si buuxda u muujin saameynta xaaladaha cimiladu ku yeesheen raadinta doon yar oo qallibantay ama dad biyaha ku dhex jira, haddana shaki badan lagama qabo in cimiladu ay door weyn ku lahayd ku guuldarraysashada in la helo dadka doonta saarnaa. Hase ahaatee, tani jawaab buuxda uma aha su’aasha ah waa maxay sababta goobta shilka ‘Charlie’ loo heli waayay. Waxa jiray qodobo kale oo dheeri ah oo horseeday guuldarada raadinta.

Ugu horrayn, gaadiidka keliya ee badeed ee hawsha loo diray waxay ahayd doonta Ciidamada Ilaalinta Xuduudaha ee Valiant. Si guud, doomaha badbaadada ee RNLI ayaa kaga habboonaan lahaa badbaadinta dadka saaran doon yar oo degaysa ama biyaha ku dhex jira. Si kastaba ha ahaatee, waxa jiray walaac la fahmi karo oo ku saabsanaa in gaadiidka iyo shaqaalaha loo marxiyo maalinimada soo socota – oo shaqo culus la filiyay – taas oo keentay in SMC-ga joogay Dover aaanu RNLI ka dalban kaabis dheeri ah habeenimadii 23 illaa 24 Noofeembar 2021. Marka Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ay Ciidamada Ilaalada Xeebaha Faransiiska ka heleen inay jiraan afar doomood oo yaryar oo aag isku mid ah kaga sugan Marinka Dover, oo ay saaran yihiin wadar dad ah oo ka badan inta ay qaadi karto doonta Valiant, waxay ahayd inay texgeliyaan inay dib ugu laabtaan go’aankoodii ahaa in aanay codsan gaadiid iyo shaqaale badeed oo dheeraad ah. Waxa tan is hortaagay lama heli karayn shaqaale iyo gaadiid badeed oo fuliya.

Ta labaad, baaqa Gurmad dalbashada waxa la joojiyay ka hor intaanay Valiant ag istaagin doomaha yaryar midkoodna. Maadaama aan markaas lahayn macluumaad ku filan oo muujinaya in goobta dhacdada ‘Charlie’ la helay ama in aan loo baahnayn wax caawimo dheeraada ah, joojinnta baaqa Gurmad (Mayday) waa lagu degdegay. Kadib markii helikabtarka raadinta iyo samatabixinta, R163, ay goobta timid, Valiant way joojisay raadintii bilaa jihada ahayd oo waxay diyaaradu ku hagaysay goobta doonta yar ee ay soo aragtay R163.

Ta saddexaad, dhibaatooyin ayaa ka jiray raadinta ay sameysay helikabtarta R163. Marka la fiirsho falanqaynta socodka mawjadaha sabaynta walxaha ee ay sameysay Waaxda Baarista Shilalka Badda (MAIB), waxay u badan tahay in R163 ay baarasay halka doonta yari ku gaddoontay. Hase ahaatee, raadinteedu kumay guulaysan helitaanka doonta yar ee qallibantay ama dadka biyaha ku dhex jiray. R163 si khaas ah looguma xilsaarin shilka 'Charlie', Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska kumay wargelin inay hesho doon yar oo degaysa iyo dad biyo ku dhex jira. Kabtanka R163 wuxu Baaritaanka u sheegay haddii lagu wargeli lahaa inuu raadiyo dad biyaha ku dhex jira 'taasi xaaladda way beddeli lahayd'. Taas beddelkeeda, R163 waxa loo diray inay raadiso dhowrka doomood ee yaryar ee la rumaysnaa inay ku sugnaayeen aagga isku midka ah.

Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska umay sameyn qorshe raadineed rasmi ah R163. Sidaas darteed, naqshadda ay siiyeen R163 may ahayn mid ku saleysan farsamooyinka qorshaynta raadinta ee Tilmaamaha Raadinta iyo Badbaadinta Badda iyo Hawada ee Caalamiga ah (AIMSAR). Ciidama Ilaalada Xeebaha Ingiriiska R163 may siin tilmaamo raadineed buuxa sida intay isu jirayaan dariiqyada raadinta ee diyaaradu koobayso (track spacing) iyo halka ay ishu qabanayso (sweep depth). Xisaabinta inta u dhexaynayas dariiqyada markiiba diyaaradu dulmarayso waxa lagu saleeyay bartilmaameedka raadinta. Si kastaba ha ahaatee, shaqaalaha R163 lama siin macluumaadkan waxana loo daayay inay iskood u go'aansadaan kaladurkinta dariiqyada raadintooda.

Kaladurkinta dariiqyada raadinta (track spacing) ay ku hawlgashay R163 waxay ahayd 0.7 nowtikaal mayl (nm) si waafaqsan talobixinta Buuga Tilmaamaha IAMSAR ee doomaha yaryar ee dhererkoodu u dhexeeyo 6 illaa 10 mitir marka xilligu habeen yahay, halka Buuga Tilmaamaha IAMSAR soo jeedinayo in la qaato kaladurkin tan ka hooseyso, oo koobaysa aag intan ka yar, si loo helo qof biyaha ku jira. Baaritaanku kuma qancin in 0.7nm ay ahayd kaladurkinta dariiqyada raadinta (track spacing) ee ku habboonayd raadinta dadka biyaha ku jiray habeenimadii 23ka illaa 24 Noofeembar 2021. Maadaama masaafada wax laga arki karay ay hoosaysay suurtogal umay ahayn R163 inay hesho qof biyaha dulsaar illaa iyadoo toos u dul marta maahane. Dhulka ballaaran ee uu koobayay aagga loo asteeyay R163 ayaa aad u yareeyay suurtogalnimada R163 toos ugu dulmari kartay dadka. Iyadoo aan la sameyn qorshe raadineed, Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska suurtogal umay ahayn inay go'aamiyaan in raadinta R163 guulaystay. Sidaas darteed, aamin umay ahayn Ciidamada Ilaalada Xuduudaha HM inay isku halleeyaan natiijooyinka raadinta Valiant iyo R163 si ay u go'aamiyaan in hawlgalka raadinta iyo samatabixinta dhacdada 'Charlie' la soo gebagebeeyo. Howlgalka raadinta kiiska 'Charlie' wax ku ool muu noqon inkastoo taas aan lala xiriirin karin kabtanka iyio shaqaalaha Valiant ama R163.

**Cutubka 12** wuxu fiirinayaa go'aanka lagu joojiyay howlgalka raadinta doonta yar ee ku lugta lahayd dhacdada 'Charlie', wuxuna qiimeynaya waxyaabaha loo cuskaday go'aanka iyo qaabka go'aanka loo diiwaangeliyay.

Cutubku wuxu soo bandhigayaa gunaanad wata natiijooyin muhiim ah, oo ay ka mid yihiin in inkastoo Valiant ay soo qaaday saddex doomood oo yaryar intii ay howlgalka ku jirtay habeenimada 23 illaa 24 Noofeembar, midkoodna may buuxin macluumaadka ku saabsanaa kiiska 'Charlie' ee ay hayeen Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska. Si kastaba

ha ahaatee, Baaritaanku wax shaki ah kama qabo in dhammaan dadkii ku lugta lahaa hawlgalkii dhacay habeenimadaii 23 illaa 24 Noofeembar 2021 ay aaminsanaayeen in arrinta dhacdada 'Charlie' la xalliyay dhammaadka heeganka habeenkaas. Gaar ahaan, SMC-ga Dover ee heeganka ahaa habeenkaas wuxu doonta yar ee labaad ee ay soo qaadday Valiant u aqoonsaday inay ahayd doonta kiiska 'Charlie' inkastoo go'aankan aan qoraal ahaan loo diiwaangelin ama aanu la wadaagin asxaabta heeganka kula jirtay habeenkaas.

Maadaama kaydinta xogtu fashilantay, isdhaaf baa ku yimi gunaanadka uu sameeyay SMC-ga Dover iyo macluumaadka ku jira diiwaanada xogta. Xogahaasi waxay sheegayaan in doontii ugu horreysay ee ay soo qaaday Valiant ay ahayd doontii kiiska 'Charlie', halka SMC-ga Dover tan ku sheegay dhacdo kale, dhacdo 'Lima'. Khaladaadkan marnaba lama xallin.

Macluumaadka ay hayeen Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ee ku saabsanaa dhacdada 'Charlie' sida muuqata way khilaafsanayd macluumaadka lagula kulmay doonta yar ee labaad ee ay soo qaadday Valiant. Markii doontaas yar la helay, SMC-ga Dover muu rumaysan in macluumaadka uu ka helay heerka dhibaatada ay ku jirtay 'Charlie' inay run ahayd. Taasina waxay waafaqsanayd fahamka iyo fikirka Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ay ka haystaan xaaladdan.

Illaa bishii Nofeembar 2021, waxa xarunta Ilaalada Xeebaha Ingiriiska guud ahaan laga aaminsanaa in dadka ka soo waca doomaha yaryar ay inta badan buunbuuniyaan heerka khatareed ee ay ku sugan yihiin. Fikirkan sida ballaaran uga dhex jiray xarunta ayaa saameyn taban ku yeeshay raadinta iyo badbaadada dhacdada 'Charlie'. Waxay taasi keentay in markii Valiant iyo R163 aanay helin wax doon yar ah oo degaysa ee ay istaageen wicitaanada laga helayay kiiska 'Charlie', SMC-ga heeganka kaga jaray Dover wax tixgelin ah muu siin inay dhici kartaa in dadkaas doontaas saarnaa toos biyaha u dhex galeen.

Bilowgii heeganka maalinta 24 Noofeembar 2021, waxa la aaminsanaa in dhacdada 'Charlie' la xalliyay, in kastoo markaas dhacdadaasi diiwaanada xogta Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska uga muuqatay inay weli taagan tahay. Hawlwadeenada shaqada ee ku jiray heeganka maalinimo waxay isku halleeyeen xogta ay ku soo wareejiyeen heegankii habeenimo iyo sidoo kale xogta khaldan ee ku jirtay diiwaanada xogta sidaas darteedna si rasmiya ay u xireen kiiska isla maalintaas.

## Qaybta 4: Aqoonsashada dadka doonta saarnaa

**Cutubka 13** wuxu soo bandhigaya hawsha Baaritaanku galay si uu u helo aqoonsiyada dadkii doontaas yar saarnaa habeenimadii 23 illaa 24 Noofeembar 2021. Wuxu xaqiijinayaa in 26 ka mid ah 27dii qof ee maydkooda la soo helay loo aqoonsaday si Baaritaanku ku qancay. Inkastoo aqoonsiga qofka 27aad aan si buuxda loo go'aamin, Baaritaanku wuxu hayaa tibaax sheegaysa cidda uu yahay. Wuxu sidoo kale sharraxayaa in Baaritaanku isagoo kalsooni macquul ah qaba go'aamiyay in ay jireen afar qof oo kale oo doonta saarnaa oo aan maydkooda la helin. Baaritaanku wuxu sidoo kale go'aamiyay aqoonsiyada labada qof ee badbaaday.

Baaritaanku wuxu sidaas darteed go'aamiyay in dadka doonta saarnaa ahaayeen 33 qof. Md. Issa Mohamed Omar oo ka mid ahaa labada qof ee shilka ka badbaaday ayaa Baaritaanka u sheegay in dadka doonta saarnaa ay ahaayeen 33 qof. Inkastoo aanay jirin sabab looga shakiyo caddeynta Omar bixiyay, haddana suurtogal may noqon in si hubaal ah loo go'aamiyo inay doonta saarnaayeen dad ka badan 33 qof.

**Cutubka 14** wuxu macluumaad taariikh nololeed ka bixinayaa dadkii dhintay iyo kuwa maqan ee doontaa saarnaa, iyadoo xogta lagala soo baxay sawirro ay bixiyeen qoysaskoodu, markii la heli karo. Cutubku wuxu soo koobayaa caddaynta xubnaha qoysaska ee ku saabsan saameynta ay ku yeelatay in dadkoodi dhinteen ama la waayaya.

## Qaybta 5: Gunaanad iyo soojeedino

**Cutubka 15** wuxu isku keenaya natiijooyinkii ka soo baxay Qaybaha 2 iyo 3 ee warbixinta wuxuna qiimeynayaa isagoo fiirinaya caddaymaha uu helay Baaritaanku illaa heerka qaar ka mid ahnafahaas baxay la badbaadin karay. Wuxu goaamiyay baaritaanku in nafahaas la badbaadin karay.

Cutubku wuxu ku bilaabay hadalka inuu qiro gunaanadka MAIB ee dhahaya "maadaama ay dadka ku soo rareen doon aan habboonayn oo wadata qalab badbaado oo aan ku filnayn si ay marinka uga soo gudbaan, oo ay 33 qof si buux dhaaf ah ugu rareen doontaas, dadkii soo agaasimay safarkaas ayaa dadka doonta saaran geliyay khatar sare oo dhibaato ku soo gaarayso".

Dhinaca badbaadista, khabiirka Baaritaanka, Barafasoor Michael Tipton MBE, wuxu go'aamiyay in dadka doonta saaran badankoodu qarqoomeen ka dib markay si haysan kari waayeen wixii doonta ka haray maadaama jirkoodu taag gabay sababo la xiriira gacmahooda, cududahooda, iyo lugahooda oo barafoobay, miyir-doorsoomid, ama in wadnuhu istaagay qabowga dartood. Sida ugu badan, sababta ugu badan ee keentay dhimashada waxay ahayd in dadku qarqoomeen. Wuxu go'aankan gaaray iyadoo aan wax xog ah laga helin baaritaanka maydka lagu sameeyay ee ay sameeyeen hay'adaha dowladda Faransiiska.

Barafasoor Tipton waxa uu qabaa inkastoo dadka qaarkood markiiba qarqoomeen ka dib markay taabteen biyaha qaboow, suurtogal maaha in xilligaas iyo sababtaas keentay dhimashada dadka badankooda. Sidaas darteeed, waxay u badan tahay in dadka badankoodu ku dhinteen muddo dheer oo ay weli noolaayeen, markii qiyaastii 03:24 ee 24 Noofeembar 2021 doonta Ciidamada Ilaalada Xuduudaha ee Valiant soo gaartay goobta baaqa Gurmad Dalbashada. Barafasoor Tipton wuxu aaminsan yahay in dadka doonta yar saarnaa qaarkood ay dhinteen qorraxa soo baxa qiyaastii 07:00 kuwo kalena ay dhinteen intii u dhexaysay qorrax soo baxa iyo xilligii badbaadinta ee 24ka Noofeembar 2021. Waxa la qiyaasi karaa markaas, marka la fiirsho fikirka uu qabo Barafasoor Tipton, inay suurtogal tahay in qaar noolaayeen illaa 07:00 ee 24ka Noofeembar, halka qaar kale – tiro kooban – weli noolaayeen illaa galabnimada qaybteeda hore.

Cutubku wuxu xusayaa inay iswaaqsan yihiin fikradaha Barafasoor Tipton iyo xaaladda uu tooska ula kulmay ee uu indihiisa ku soo arkay Md. Issa Mohamed Omar, mid ka mid ah

labada qof ee ka badbaaday shilka ee Baaritaanku waraystay. Warbixintii hadalka ahayd ee uu Md, Omar siiyay Baaritaanka wuxu ku adkaystay in dadku badbaadeen markay galeen biyaha, iyo in qiyaastii 10 qof weli sii noolaayeen illaa subaxnimadii. Suurtogal maaha, sida uu qabo Barafasoor Tipton, in mid ka mid ah dadka maqan sii noolaayeen wax ka badan afar illaa shan saacadood ka dib markay galeen biyaha. Midkastoo dadkaas ka mid ah wuxu dhintay intii u dhexaysa 07:00 iyo 12:30 ee 24ka Noofeembar 2021.

Isagoo xiganaya xogtan, wuxu cutubku dib ugu laabanaya xaaladda Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska, ee lagaga soo hadlay cutubadii hore, isagoo ku bilaabaya xaaladda shaqaale ee ka jirtay MRCC Dover iyo saameynta ay ku yeelatay dhacdooyinka dhacay habeenkaas. Dhibaatooyin khaas ah oo dhanka shaqaalaha iyo agabka ah oo soo noqnoqotay ayaa la aqoonsaday kuwaas oo ay la kulmayeen Ciidamada Ilaalada Xeebaha laguna xiriiriyay khataro shaqo, oo ay ku jiraan nafo ku baxay jawaabcelin khaldan, ka warqabka xaaladaha oo aan jirin, iyo saameyn wayn oo ay taasi ku yeelatay fayoqabka iyo niyadda guud ee shaqaalaha. Xaqiiqadu waxay sheegaysaa in shaqaalaha MRCC Dover ay hawluhu ka tan bateen habeenkii 23ka illaa 24 Noofeembar 2021.

Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska way ka warqabeen dhibaatooyinka iyo khataraha. Caddaynta baaritaanku helay, waa haddii ay jirtoba, ee sheegaya in hawlahan wax laga qabtay ka hor Noofeembar 2021 way kooban tahay. Cutubku wuxu ku nuuxnuuxsaday cilladaha DfT ee kormeerista MCA (iyo sidoo ilduufka MCA ee kormeerka Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska) ee ka hor iyo ka dibba dhacdadii 24kii Noofeembar 2021. Maadaama aanu jirin kormeer wax ku ool ah, heerka baahida loo qabo isbeddel si ku filan looma aqoonsan oo wax loogama qaban.

Markuu u soo jeestay hawlaha raadinta iyo badbaadinta ee habeenkaas, cutubku wuxu xusay laba qodob oo muhiim ah. Ugu horreyn, wuxu xusayaa sida Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska u go’aansadeen inay baahiyaan baaq Gurmad Dalbasho 24kii Noofeembar 2021 saacadu markay ahayd 02:27. Tani waxay muujisay in rakaabka saaran doonta ‘Charlie’ khatar ku jiraan oo waxay waajib ka dhigaysay in doomaha aagga maraya ka soo jawaabaan baaqa. Doonta ugu dhow dhacdada ‘Charlie’ waqtiga la helay baaqa Gurmad dalbashada waxay ahayd markabka dagaal ee Faransiiska ah ee Flamant, oo ay isticmaalayeen Ciidamada Ilaalada Xeebaha Faransiiska. Sida ku cad warbixinta ay Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska siiyeen Baaritaanka, Flamant waxay goobta baaqu ka yimi markaas u jirtay 3nm – oo qiyaastii u jirta 15 daqiiqadood. Valiant, taas beddelkeeda, waxay goobta u jirtay 9nm oo meesha u jirtay 40 daqiiqadood.

Haddana Flamant kama jawaabin baaqa Gurmad dalbashada. Ficillada iyo ilduufyada Flamant waxa laga warsugayaa baaritaanka ay wadaan hay’adaha dowladda Faransiiska, sidaas darteed saameynta codsiga tooska ah iyo amristooda weli ma cadda. Si kastaba ha ahaatee, marka la fiirsho inay dhowayd goobta shilka ‘Charlie’ ee xilliga la helay baaqa Gurmadka, iyo in doonta yari markaas isku taallay oo badqabtay waqtigaas, haddii Flamant wax ka qaban lahayd shilka ‘Charlie’, nafo badan iyo sida suurtagalka ah dhammaan nafaha waa la badbaadin karay.

Marka labaad, cutubku wuxu dib u xusayaa cilladaha ka jiray go'aan qaadashada Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ee habeenkaas, sida lagu soo sharraxay cutubada hore. Wuxu qirayaa inay jireen caqabado waawayn oo la xiriiray helista nidaamyo xog qabasho oo la isku hallayn karo oo lagula tacaamulo doomaha yaryar ee isku dayaya inay ka soo gudbaan Marinka, inkastoo Ciidamada Ilaalada Xeebaha ay arrinkaas ka warqabeen ka hor Noofeembar 2021. Laga soo bilaabo bilowgii shiftiga habeenimo ee 23ka Noofeembar 2021, Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waxa caqabad ku ahaa la'aanta xog sugan oo ku saabsan doomaha ka soo gudbaya Marinka Dover. Wax duulimaad kormeer ah lama sameyn jawiga cimilo ee jiray darteed. Macluumaadka ay soo gudbiyeen hay'adaha dowladda Faransiisku way koobnaayeen oo soo daaheen si macno lehna loogama jawaabin baaqii Gurmad Dalbashada.

Si kastaba ha ahaatee, markii SMC-ga joogay Dover qabtay wicitaankii u horeeyay ee dhacdada 'Charlie' taasi oo dhacday saacadu markay ahayd 01:48 wuxu rumaystay inay suurtogal tahay in xaalad degdeg ah jirto. Inkastoo qiimeyntani jirtay, iyo weliba si ka dhan ah habraacyada shaqo ee dejisan, dedaal kooban ayaa la geliyay in xog buuxda laga qabto wicitaanadii xigay oo macluumaadka dadka soo wacay xaruntu sheegeena sidooda looma qaadan. Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waxay sidoo kale seegeen fursado ay macluumaad cusub oo ku saabsan goobta juqraafiyeed kaga qaadi lahaayeen doonta markay soo wacday.

Intaas waxa dheer, fursado ayaa lagu lumiyay hawlaha raadinta oo ay fuliyeen Valiant iyo helikabtarta R163 iyagoo tilmaamo ka helaya Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska. Labada gaadiid mindkoodna laguma wargelin inay jirto doon yar oo degaysa ama inay jiri karaan dad biyaha ku dhex jira oo doontii la degtay oo midkoodna lama siin tilmaamo raadineed oo dhammeystiran. Xaqiiqatan, Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska umay sameyn qorshe raadineed rasmi ah dhacdada 'Charlie'. Ma jiro qof saarna doonta 'Charlie' oo la helay. Xaaladaha cimilo ee habeenkaas jiray jawaab qayb ah oo aan kaafi ahayn ayay ka bixiyeen sababta loo heli waayay dadka doonta saarnaa. Sida lagu sharraxay cutubada hore, khaladaadka ku jiray hawlahaas raadinta waxay masuuliyadoodu waxay la xiriirayeen Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska, ee maaha kuwo la xiriira Valiant ama R163.

Intaas ka dib waxa iyana jirtay in SMC-ga joogay Dover doonta labaad ee ay soo qaaday Valiant si khaldan ugu aqoonsaday doontii 'Charlie' inkastoo iskhilaaf muuqda u dhexeeyay macluumaadka laga hayay doonta 'Charlie' iyo doonta labaad ee la helay. Aqoonsiga khaldani wuxu ugu dambeyntii dhaliyay in raadinta la gebegebeeyo ka hor xilligii ku habboonayd.

Cawaaqibka ka dhashay aaminadaas khaldan ee sheegaysa in arrintii doontii 'Charlie' la xalliyay waxay dhalisay in aan Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska qaadin wax tallaabo ah oo lagu raadinayo ama lagu badbaadinayo dadka weli noolaa ee biyaha ku jiray, intii u dhexaysay 06:46 oo ah marka Valiant dhammaysay hawlaha raadinta, iyo 12:57 oo ah markii Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska lagu soo wargeliyay maydad biyaha dul sabbeynaya oo ay soo sheegtay doon kalluumaysi oo maraysay biyaha Faransiiska. Haddii kale raadinta waxa la wadi doontaa illaa laga gaarayo waqtiga ugu dambeeya ee dadkii soo noolaan kareen sida ay xisaabiyeen Ciidamada Ilaalada Xeebaha

Ingiriiska, sidaas darteed waxay socon lahaayeen guud ahaan maalinta 24 Noofeembar. Xaaladda masaafada la arki ee gaaban iyo ta waqtiga habeenimo midkoodna caqabad kuma noqdeen hawlaha raadinta. Helikabtarta R163 si fudud oo muuqata ayay hawada uga arkaysay maydadka galabnimadii 24ka Noofeembar 2021. Haddii raadinta dadka badbaaday si buuxda loo wadi lahaa 24ka Noofeembar, oo ay ku jiraan saacadaha maalinimada, nafo badan ayaa la badbaadin lahaa.

Sida lagu caddeeyay falanqaynta, cilladaha ka jiray go'aan-qaadashada Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waxay ahaayeen kuwa nidaamiya. Khaasatan waxay la xiriireen culayska adag ee saarnaa shaqaalaha Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ee ka shaqeynayay MRCC Dover ee maareynayay hawlaha raadinta iyo badbaadinta doomaha yaryar, shaqaalaha oo aan helin wax kormeer ah, iyo aaminaadda ka dhex sameysatay shaqaalaha Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ee sheegays in dadka saaran doomaha yaryar ee soo waca xarunta buunbuuniyaan heerka khatarta ee ay ku sugan yihiin.

**Cutubka 16** wuxu qiimeynayaa horumarka laga sameeyay dhaqangelinta soojeedimaha laga helay saddexda baaritaan ee hore ama qiimeynaha lagu sameeyay dhacdada 23 illaa 24 Noofeembar 2021. Saddexdaas baaritaan waa warbixinta ay soo saareen MAIB ee horay loo soo xusay, qiimeyn labaad oo ay sameeyeen Ciidamada Ilaalada Xeebaha Maraykanka ee ku taariikhaysan Luulyo 2023, iyo qiimayn lagu sameeyay gudaha Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska kaaso isago qabyo qoraal ah la soo saaray Meey 2024.

Cutubku wuxu sheegaya in dhammaan qiimeynuhu soo saareen talooyin, kuwaas oo qaarkood la aqbalay lana dhaqangeliyay. Hase ahaatee, soojeedinaha qaarkood waa la diiday, kuwaas oo ay ka mid yihiin tiro soojeedino ah oo ay bixiyeen Ciidamada Ilaalada Xeebaha Maraykanka. Intaas waxa dheer, Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waxba kamay qaban qaar ka mid ah fashiladii waawaynaa ee Baaritaanku daaha ka qaaday.

**Cutubka 17** wuxu soo bandhigaya talooyinka Baaritaanku soo jeediyay, ee waafaqsan Shuruudaha Tixraac, kuwaas oo loogu talagalay in lagu yareeyo in dhacdadan oo kale dib u soo noqoto. Soojeedinahan waxa loo kala qaaday afar qaybood:

- soojeedinaha qaybta ugu horreysa waxay la xiriiraan hawlaha raadinta iyo badbaadinta ee doomaha yaryar ee marinka ka soo gudba, oo ay ku jirto falceliskii laga sameeyay dhacdadii 23 illaa 24 Noofeembar 2021.
- qaybta labaad ee soojeedinaha waxay la xiriiraan hawlaha raadinta iyo samatabixinta ee guud ahaan shilalka khasaaraha badan ka dhashaan.
- qaybta saddexaad ee soojeedinaha waxay ka hadlayaan arrimo sharci iyo qaab dhismeed oo khuseeya hay'adaha waddanka Ingiriiska ee ku lugta leh hawlaha raadinta iyo badbaadinta.
- qaybta afraad ee soojeedinaha waxay la xiriirtaa daabicista macluumaad ku saabsan dhaqangelinta soojeedinaha ay sameeyeen MAIB.

Talooyinka la bixiyay waa kuwan soo socda:

## Talooyinka u khaaska ah hawlaha raadinta iyo badbaadinta ee ka falcelintii dhacdada 23 illaa 24 Noofeembar iyo doomaha yaryar ee soo gudbaya.

**Soojeedinta 1aad:** Maadaama ay jirto khatar ku lammaan isticmaalka shaqaale-wadaaga heer qaran ee Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska ee hawlaha raadinta iyo samatabixinta kaasoo keena in shaqaalaha loo kala qaybiyo goobo juqraafiyeed oo kala duwan, Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waa inay qaadaan tallaabooyin lagu yareynayo khataraha (sida ka warqab la'aan xaaladeed ee ka dhasha shaqo-wadaaga) oo ay si joogto ah u qiimeeyaan wax ku oolnimadooda.

**Soojeedinta 2aad:** Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waa inay waqti ku habboon ku raadsadaan kuna maalgashadaan farsamo iyo tikhnoolajiyad ka taageertaa iswaafajinta shilalka doomaha yaryar si aanay isagaga khaldamin mar dambe. Haddii dhaqaale looga waayo arrintan miisaaniyadda Hay'adda Ilaalinta Badaha iyo Xeebaha (MCA), Waaxda Gaadiidka (DfT) waa inay hubiso in dhaqaale kale loo raadiyo hawshan.

**Soojeedinta 3aad:** Waa in Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriisku qiimeyn joogto ah ku sameeyaan in agabka iyo shaqaalaha u diyaarka ah inay ka jawabaan hawlaha doomaha yaryar ee hadda iyo mustaqbalka dhowba ku filan yihiin. Haddii agabka iyo shaqaalaha la qiyaasayo in loo baahan yahay lagu keeni kari waayo miisaaniyadda dejisan, arrinta waa in degdeg loogu gudbiyaa Waaxda Gaadiidka.

**Soojeedinta 4aad:** Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska tababar iyo dib u tababaris joogto ah shaqaalahooda ka siiyaan hawlaha u gaarka ah raadinta iyo badbaada doomaha yaryar, tababarkaas oo mid ku saabsan yahay in la iska ilaaliyo ismoodsiinta dhaqanka noqotay, khaasatan, in la aamino in wicitaanada doomaha yaryar gurmadka dalbanaya buunbuunsan yihiin.

## Talooyinka ku saabsan ka jawaabista raadinta iyo badbaadinta guud ahaan shilalka khasaarahoodu badan yihiin. Talooyinku waxay ku habboon yihiin, inkastoo aanay gaar u ahayn, hawlaha doomaha yaryar waxana loogu talagalay in horumarin guud loogu sameeyo jawaabaha raadinta iyo badbaadinta badaha Ingiriiska.

**Soojeedinta 5aad:** Shaqaalaha ka shaqeeyaa raadinta iyo badbaadinta waa inay raacaan habraaca kalamudnaansiinta dadka la badbaadinayo ee loo yaqaan Mass Persons in the Water Triage si ay ugu maareeyaan hawlaha ka facelinta dhacdooyinka raadinta iyo badbaadinta marka tirada dadka u baahan badbaadintu ka bataan awoodda unuga raadinta iyo badbaadinta goobta jooga.

**Soojeedinta 6aad:** Dadka ka shaqeeya hawlaha raadinta iyo samatabixinta waa inay sii joogto ah ugu wada tababartaan dhaqangelinta habraaca kala mudnaansiinta dadka la badbaadinayo ee loo yaqaan Mass Persons in the Water Triage.

**Soojeedinta 7aad:** Waaxda Gaadiidku waa inay ka fekerto inay Hay'adda Caalamiga ah ee Badaha kula taliso inay qalabkeeda maareynta shilalka biyaha ee khasaaraha badan ku soo kordhiso siyaasadahooda iyo harbaacyadooda.

**Soojeedinta 8aad:** Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waa inay wax ku beddel ku sameeyaan siyaasadaha u dejisan si ay ugu daraan baahida loo qabo talo dhammeystiran oo ku saabsan badbaadinta dadka khatarta wajaha ee badaha ku jira.

**Soojeedinta 9aad:** Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waa inay hubiyaan inay isticmaalayaan nidaamyadii saxda ahaa ee lagu qiyaasayay heerka dadku ku sii dhex noolaan karaan biyo qaboow. Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waa inay wax ka beddel ku sameeyaan siyaasadahooda ay ku hubinayaan inay si joogto ah u aqoonsadaan xogta muhiimka ah ee ku saabsan macluumaadka laga soo uruurinayo dadka biyaha ku jira. Haddii ay dhacdo in tirada dadka ee biyaha ku jirta adkayso xog soo uruurinta, siyaasadaha Ciidamada Ilaalada Xeebaha waa inay mudnaan siiso soo uruurinta xogta muhiimka ah.

**Soojeedinta 10aad:** Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waa inay wada-shaqeynta iyo xiriirka la sii wadaan hay'daha kale ee raadinta iyo samatabixinta ee Ingiriiska si loo aqoonsado fursadaha koboca ama soo kordhinta qalab iyo farsamooyin lagu caawinayo hawlaha raadinta iyo badbaadinta.

## Talooyinka ku saabsan ururada Ingiriiska ee ku lugta leh hawlaha raadinta iyo samatabixinta badda.

**Soojeedinta 11aad:** Doorka Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriisku ku yeelanayaan wadashaqeynta waa in loo adeegsado sharciga cusboon ee ugu dambeeyay.

**Soojeedinta 12aad:** Hay'ad madaxbannaan waa in loo xilsaaro qiimeynta joogtada ah ee tayada iyo wax ku oolnimada hawlaha Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska. Waa in tixegelin la siiyo in hawsha kormeerka la hoos geeyo Kormeeraha Hawlaha Dabka iyo Adeegyada Samatabixinta Ingiriiska (Majesty's Inspectorate of Constabulary and Fire and Rescue Services).

**Soojeedinta 13aad:** Dowladdu waa in dib u fiiriso soojeedinta Md. Downer ku bixiyay qiimeyntiisii madaxabannaanayd ee Ciidamada Xuduudaha halkaas oo uu sheegay inay tahay in Ciidamada Xuduudaha Badda aanay ka qaybqaadan hawlaha raadinta iyo samatabixinta ee ka jira Kanaalka Ingiriiska, tani waxay ka dhigan tahay in masuuliyadda agabka iyo shaqaalaha loo adeegsanayo raadinta ay tahay inay wada qaataan Ciidamada Ilaalada Xeebaha.

**Soojeedinta 14aad:** Inta nidaamyada iyo habraacyada hadda ee dhanka raadinta iyo samatabixintu Kanaalka Ingiriisku sii degsan yihiin, waa doorarka iyo masuuliyadaha Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska iyo Ciidamada Xuduudaha lagu caddeeyo isafgrad dhexmara labada haayadood.

**Soojeedinta 15aad:** Ciidamada Ilaalinta Xeebaha ee Ingiriska waa in ay dejiyaan oo ay dhaqangeliyaan qorshe tababarro wadajir ah oo dhaca xilliyo go'an. Tababarradaas waa in ay ka qaybqaataan dhammaan dhinacyada ku lugta leh hawlgallada baaritaanka iyo samatabixinta badda ee Kanaalka Ingiriiska iyo meelaha kale.

**Soojeedinta 16aad:** Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska waa inay soo saaraan qorshaha howlgalka samatabixinta dadka badan oo uu ku jiro amarbixinta iyo xakamaynta, isku-dubbaridka, daneeyayaasha dibadda, doorarka caafimaad iyo sharci fulineed, iyo arrimaha dibadda iyo dadwaynaha.

**Soojeedinta 17aad:** Ciidamada Ilaalada Xeebaha Ingiriiska iyo Hay'adda Badaha iyo Xeebaha waa in ay wada dejiyaan nidaam rasmi ah (protocol) oo ku saabsan sida Ciidamada Ilaalada Xeebaha ay kiisaska ugu gudbinayaan qaybta baaritaannada u hoggaansanaanta sharciga ee Hay'adda Badaha, iyagoo caddeynaya xadka ama shuruudaha lagu go'aaminayo in kiis la gudbiyo marka ay jirto suurtagalnimada in doon ay jabisay waajibaadka bixinta gargaar, macluumaadka la gudbinayo iyo sida tirada gudbinta kiisaska loo diiwaangelinayo loona soo warbixinayo sannad kasta.

## Daabicista tallaabooyinka dhaqangelinta ee lagaga jawaabayo soojeedinaha Laanta Baaritaanka Shilalka Badaha (Marine Accident Investigation Branch)

**Soojeedinta 18aad:** Laanta Baaritaanka Shilalka Badaha waa in ay degdeg shabakaddeeda internet-ka ku soo dhigto, isla marka ay hesho, faahfaahinta tallaabooyinkii wax-ku-oolka ahaa ee ay qaadeen kuwa talooyinka loo jeediyay. Haddii aan tallaabo la qaadin, waa in ay sidoo kale soo dhigaan sharraxaad sababta aan loo qaadin tallaabooyinkaas, ilaa ay jiraan sababo xooggan oo arrintaas ka hor istaagaya maahane. Haddii loo baahdo, Xeer-nidaamiyayaasha 2012 waa in wax ka beddel lagu sameeyo.

E03525225

978-1-5286-6169-0